Soomaali

Sidee ayaan u helaa korantadeyda?

Tani waa siday wax u shaqeeyaan. Dhamaan qoysaska Iswiidhan degan waxay u baahan yihiin inay haystaan hal kontaraag oo ay shirkad khadka korontada leh la leeyihiin iyo hal kontaraag oo ay shirkad koronto ka ganacsata la leeyihiin. Shirkadda khadka korontada waxa ay leedahay khadka korontada ee aagaaga maraaya iyadoo shirkadda ka ganacsata korontaduna ay adiga korontada aad isticmaasho ku siineyso. Si aad u hesho korontada gurigaaga soo galeysa ayaa ah nidaam in laba talaabo la qaado u baahan: marka hore waa inaad iska diiwaan galisaa shirkadda khadka korontada leh ka dibna waxaad anaga nagala soo xiriiri doontaa Bixia. Shirkadda khadka korontada ayaa iska leh khadka korontada, gurigaaga keenaaya korontada iyagoo sidoo kale maareeya wixii korontada kaa go'da ku saabsan. Adigu ma dooran kartid shirkaddaada khadka korontada leh laakiin waxaad si xor ah u dooran kartaa shirkadda koronto bixisa.

Markaad guri ama aqal dabaq ah oo cusub u soo guureyso, waxa muhiim ah inaad la xiriirto shirkadda khadka korontada leh si aad deganaanshahaaga guriga ugu diiwaangeliso. Waxa sidoo kale muhiim ah inaad anaga oo Bixia ah nala soo xiriirto si aad ugu hesho kontaraaga korontada ee ugu haboon adiga baahidaada. Haddii aanad adigu si cad ugu dooran kontaraag bixinta korontada ah, ayaan anaga la noo oggolaan inaanu mid kuu doorno, ee waxaad heli doontaa kontaraag khaas ah (anvisningsavtal) kaas oo badnaa noqda mid aad uga qaalisan kontaraagyada kale ee bixinta korontada.

Markaad nala soo xiriirto, ayaanu u baahan doonaa inaan ogaano:

- Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiga (Lambarka Aqoonsiga Bulshada ee Iswiidhan)
- Magacaaga, cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka
- Taariikhda aad rabto in kontaraaga soo gelinta korontada laga bilaabo
- ID-ga eeriyadaada/deegaankaaga (nätområdesid) iyo ID-ga nidaamka korontada (anläggningsid). Waxaad macluumaadkan ka heli doontaa biilka korontada ama waxaad macluumaadkaas dalban kartaa markaad iska diiwaan gelinaso shirkadda khadka korontada leh.

Nagala soo xiriir:

Adeegga Macaamiisha 0771-60 30 30
Waxaad soo waci kartaa +46 771 60 30 30 Iswiidhan dibadeeda.
kundservice@bixia.se

Saacadaha furitaanka
Isniin-Khamiis 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo
Jimcaha 9 subaxnimo ilaa 6 galabnimo

Waayo Bixia?

Ta ugu wanaagsani waa in markaad macmiil gaara/baraayfat ah oo Bixia tahay aad helayso koronto 100% tamarta dib loo cusbooneysiiyo/dib looga faa'iideysto ah iyadoo aanad wax dheeraad ah bixineynin. Wadajir, ayaynu ugu qabaneynaa wax ka badan inaynu kaliya isticmaalno tamarta dib loo cusboonaysiin karo ee la heli karo uun – waxaanu sidoo kale ka qeyb qaadaneynaa sidii loo sii kordhin lahaa hellitaanka kuwaas. Waxaad heleysaa adeeg macmiil oo aad u heer sareeya, shuruudo iyo xeerar wanaagsan, iyo kontaraag qiime ahaan u qalma baahidaada. Waxaanu dooneynaa inaad dareento inaad ku qanacsan tahay inaad wax wanaagsan dooratey.

Sidee ayaan u sameystaa kontaraag korontada?

Waa wax fudud inaad kontaraag korontada sameysatid ama aad heshiis kale ugu bedeshid, wax kharash ahna kuguma kaceyso inaad ka soo beddeshid shirkad kale oo koronto si aad Bixia ugu soo wareegtid. Soo wac Adeegga Macaamiisha ee 0771-60 30 30, ama emayl u soo dir kundservice@bixia.se, waxaananu kaa caawin doonaa inaad kontaraag cusub oo Ingriisi ku qoran aad heshid.

Waxaad sidoo kale kontaraag korontada ee Bixia ka sameysan kartaa www.bixia.se/elavtal (af Iswiidhish).

Haddii aad horeyba Bixia macmiil ugu tahay

Haddii aad horeyba Bixia macmiil ugu tahay oo aad dooneyso inaad cusboonaysiiso ama aad wax ka bedesho kontaraagaaga korontada ee hadda jira, waxaad taas ka sameyn kartaa www.bixia.se (af iswiidhish), chat nagula samee internetka boggga www.bixia.se, la soo xiriir Adeegayaga Macaamiisha. 0771- 60 30 30 ama emayl u soo dir kundservice@bixia.se.

Kooxdayada adeega macaamiisha waxay si fiican ugu hadlaan uguna qoraan af Ingiriisiga.

Aniga Boggeyga

Waxaad Aniga boggeyga (Mina Sidor) ee www.bixia.se/minasidor, aad ka arki kartaa biilashaada iyo isticmaalka korontada, iyadoo aad dib u cusbooneysiin karto qandaraaskaaga korontada. Si aad u soo gasho, waxaad u baahan tahay Lambarka Macaamiisha iyo xarafkaaga/ereyga sirta ah, kaas oo ah afarta lambar ee ugu dambeeya Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiga. Aniga Boggeyga waxa hadda kaliya lagu heli karaa af Iswidhish.

www.bixia.se/minasidor

Maxaan korontada lacagta ugu bixinayaa?

Kharashkaaga korontada waxa loo kala qeybiyaa laba qeybood. Waxaad qeyb ahaan siineysaa shirkadda khadka korontada si ay ugu dayac tiraan khadka korantada. Taasi waxay ka kooban tahay kharash go'an iyo qeyb isbedbeddela oo ku xirnaan doonta adiga isticmaalkaaga korontada (taas oo lagu cabiro inta kilowatt saacadiiba, kWh). Bixia waxba kama qaban karto qeybtan.

Waxay Bixia kugu soo dallacaysaa korontada aad isticmaaleyso. Qiimaha korontadu waxa uu ka kooban yahay lacag go'an, qiimaha korantada ee lagu heshiiyey (öre/kWh), VAT iyo wax kasta oo kharash dheeraad ah. Inta aad bixinaysaa waxay badanaa ku xirnaan doontaa qadarka koronto ee aad isticmaaleyso, tusaale ahaan tirada saacadaha oo kilowatt ah.

Sidee ayaan biilkeyga u bixiyaa?

Biilkaaga ayaa bishiiba mar ama sadddexdii biloodba mar laguu soo dirayaa.

Dooro hab biilasha la iskugu soo diri oo bay'ada u wanaagsan
Waxaanu si toos ah biil kuugu soo direynaa boostada. Laakiin in la doorto in biilkaaga bangigaaga internetka ama cinwaanka emaylka laguugu soo diro ayaa ah mid deegaanka uga wanaagsan oo adigana kaaga habboon. Noo sheeg habka biilasha laguugu soo diraayo ee adiga kugu habboon – annagu ma saarno wax kharash biilasha ah. Waxaan u baahanahay inaan ogaano Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiga, magaca bangigaaga iyo cinwaan emaylkaaga.

Miyaad rabtaa in qaddarka si toos ah looga goosto koontada bangiga?

Waxaad sida caadiga ah biilka heli doontaa bishiiba mar. Farqigu waxa weeye in lacagta si toos ah loogala baxaayo adiga koontadaada bangiga. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay waa inaad hubisid inay lacag ku filan koontadaada ku jirto. Toos ugala Bixida Autogiro waa hab habboon oo la iskaga ilaaliyo lacag bixin xusuusinta iyo la daahida lacag bixinta. Si aad iskugu qortid Toos ugala Bixida Autogiro ah, kaliya buuxi foomkan Toos ugala Bixida Autogiro oo ka dibna boosta noo soo dir. Farankoboolada ayaa horay loogu sii bixiyey.

In wadanka dibadiisa laga soo bixo
Haddii aad rabto inaad ka soo bixiso wadanka dibadiisa, ayaad u baahan doontaa inaad sheegto koodhka SWIFT iyo IBAN ah si la iskaga ilaaliyo kharash xad dhaaf ah in la saaro.

Bixia waxa ay leedahay koodhadhkan soo socda:

Kooodhka SWIFT ga: SWEDSESS

Koodhka IBAN ka: SE73 8000 0848 0691 4329 7167

Waa kee kontaraaga korontada ee ay tahay inaan doorto?

Kontaraagyadayada korontada

Qiimaha korantada ee isbedbedala
Qiimaha korantada ee isbedbedala (rörligt elpris) waxa uu ku siinayaa xorriyad ka badan iyadoo uu raaco isbedbedellada suuqa. Qiimaha korontadaada ayaa isbedbedeli doona taas oo ku xiran qiimaha ay ka taagan tahay sayladda/suuqa korantada. Inkasta oo qiimaha aad korontada ku bixiso uu isbedbedali doono bil kasta, taariikh ahaan qiimaha korantada ee isbedbedela ayaa muddo kadib noqda mid ka raqiisan. Haddii aad doorato qiimo koronto ee isbedbedela, ayaad xilliga aad doonto u beddelan kartaa mid ka mid ah kontaraagyadayada kale

Qiimaha Korontada ee Go'an
Haddii aad rabto ka sugnaan/ka isku haleyn badan oo ku saabsan qiimaha korontadaada, ayaa sicirka korantada ee go'an (fast elpris) uu yahay doorashada ugu fiican. Waxaad geli kartaa kontaraag qiime go'an ah oo 6 bilood, 1, 3 ama 5 sanno ah.

Qiimaha korantada oo isku dhafan
Haddii aad rabtid inaad isku dhafto sicirka koronto ee go'an iyo kan isbedbedelaaya, ayaad dooran kartaa qiimaha koronto oo isku dhafan (mixpris). Waxaad korontadaada nuskeed ku iibsanaysaa qiimo go'an nusna kalena waxaad ku iibsan kartaa qiimo isbedbedelaaya. Waxaad geli kartaa kontaraag qiime isku dhafan ah oo 6 bilood, 1, 3 ama 5 sanno ah.

Miyaad guureysaa?

Waxaad u guuri kartaa meel kasta oo Iswidhan ka mid ah adigoo walina sii wata/haysata Bixia inay ahaato shirkadda ku siineysa korontada.

Soo wac Adeegga Macaamiisha ee 0771-60 30 30, ama emayl u soo dir kundservice@bixia.se, waxaananu kaa caawin doonaa inaad kontaraag cusub oo cinwaangaaga cusub khuseeya aad hesho. Fadlan nala soo xiriir ugu yaraan saddex maalmood ka hor inta aanad guurin si looga fogaado wixii kharash ah ee aan loo baahnayn. Waxaanu sidoo kale la xiriiri doonaa shirkaddaada khadka korontada leh si deganaanshahaaga loogu diiwaangeliso. Waxaan kaa caawin doonaa dhinac kasta oo qaabilsan wareejinta qandaraaskaaga soo galinta korontada.

Waxa aanu u baahanahay inaanu ogaano:

- Macluumaadka shakhsiga, cinwaankaaga iyo lambarka gurigaaga haddii ay khuseyso
- Lambarka telefoonka
- Taariikhda aad rabto in adiga kontaraaga soo gelinta korontada laga bilaabo
- Haddii aad laba qof oo wada guuraya tihiin waa inaad na soo ogeysiisaan cidda kontaraaga mas'uul ka noqon doonta, maxaa yeelay kontaraaga shirkadda khadka korontada leh iyo kan shirkadda bixinta korontada leh waa in isla hal qof wada saxeexaa.